

Miisaaniyadda 2023: Taageerida dadka reer Alberta

Feb. 28, 2023

Miisaaniyadda 2023 waxay sugaysaa mustaqbalka Alberta iyadoo la siinayo gargaar dadka reer Alberta ah ee wajahaya qarashyo badan oo baahiyo maalinle ah.

Miisaaniyadda waxay balaarineysaa gargaarka kharashaadka tamarta sare waxayna siineysaa caawimo cusub ardayda iyo shaqaalaha adeegyada bulshada iyo qaybaha daryeelka gaarka. Si loo fududeeyo kharashaadka tamarta, dawladda Alberta waxay si joogto ah u kordhinaysaa barnaamijka dhimista qiimaha gaaska dabiiciga. Mar kasta oo qiimaha gaaska dabiiciga ahi uu dhaafo \$6.50 doolar halkii gaaloon, dhimista ayaa dhaqan galaysa.

Taageerida ardayda

Ardayda waxbarashada sare waxay arki doonaan \$238 milyan doolar oo talaabooyinka awood u helida nolosha. Miisaaniyadda 2023 ayaa sidoo kale kor u qaadaysa kharashka waxbarashada ee ardayda gudaha boqolkiiba laba. Ardeyda hesha kaalmada dhaqaale waxay heli doonaan caawinaad dheeraad ah oo ay dib u soo celinayaan deyntooda waxaana la dhimi doonaa heerka dulsaarka amaahda ardayda ilaa heerka ugu sarreeya.

Taageerida qoysaska

Qoysaska xaqa u leh waxay ka faa'iidaystaan doonaan tallaabooyinka awood u helida nolosha oo ay ku jiraan bixinta tooska ah ee \$100 ilmo kasta bishii illaa Juun 2023.

\$90 milyan doolar oo kale muddo saddex sano ah ayaa tilmaamaysa Faa'iidada Caruurta iyo Qoyska ee Alberta (Alberta Child iyo Family Benefit) ee sicir bararka, taasoo kordhinaysa tirada faa'iidada boqolkiiba lix sanadka 2023.

Taageerida shaqaalaha adeegyada bulshada iyo adeegyada naafada

Dawladdu waxay ka caawinaysaa inay soo jiidato oo ay hesho shaqaale badan oo adeega bulshada ah si ay u taageeraan dad badan oo baahan.

Xiriirka xogaha

[Alberta.ca/Budget](https://alberta.ca/Budget)

Wediimaha warbaahinta

Charlotte Taillon
charlotte.taillon@gov.ab.ca
780-932-5381
Xoghayaha Warfaafinta,
Guddiga Maaliyadda iyo
Keydadka

Miisaaniyadda 2023 waxa ku jira \$102 milyan doolar ee 2023-24 si loo kordhiyo mushaharka in ka badan 20,000 oo shaqaale ah oo ka shaqeeya adeegyada dadka naafada ah, hoyga hoylaawayaasha iyo barnaamijyada ka hortagga rabshadaha qoyska. Tan waxaa lagu daraa \$24 milyan doolar oo ay dowladdu siisay adeeg bixiyayaasha bishii Febraayo si loogu kordhiyo mushaharka.